



# **Wasaaradda Haweenka iyo Horumarinta Xuquuqda Aadanaha**

8-da Maarso 2019, Muqdisho.

## **INNAA LILLAHI WAA INNAA ILAYHI RAAJICUUN**

Allah ha u naxariistee waxaa maanta maagalada Dubai ku geeriyooday, Wasiirkii Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka ah ee Soomaaliya C/raxmaan Xoosh Jibrill oo ahaa halyeey qaran oo u dhaqdhaqaaqa Xuquuqda Aadanaha, gaar ahaanna waxaa uu gaashaan iyo garab u ahaa soo dhicinta Xuquuqda Haweenka Soomaaliyeed tan iyo markii uu noqday wasiirkii dastuurka ee 2011-kii, markaas oo uu guul ka keenay in la helo dastuur uu dalku kaga baxo marxaladdii ku meel gaarka ahayd sannadkii 2012-kii.

Wasiir Xoosh waxaa uu hadafkiisu ahaa in Soomaaliya ay hesho dastuur dhammaystiran oo ay ku caddahay Xuquuqda Haweenka Soomaaliyeed kaas oo isla markaasna difaacaya xuquuqda aas-aasiga ah ee muwaadiniinta. Waxaa uu ahaa halyeey aan ka gabban u istaagidda xuquuqda dadka dulman ama xuquuq raadiyayaasha.

Waxaan rabnaa in aan si gaar ah tacsii ugu diro caruurta, qoyskiisa, eheladii iyo qaranka Soomaaliyeed uu ka geeriyooday Wasiir Xoosh.

Waxaan xaqiijin doonaa in la helo hadafkii iyo halkii uu qaranka la rabay Wasiir Xoosh oo naga baxay isagoon arag riyadiisii ahayd in Soomaaliya ay hesho dastuur dhammeystiran oo ay ku caddahay Xuquuqda muwaadin kasta, gaar ahaanna Haweenka Soomaaliyeed.

## **ILAAHOW RAXMADAADA SII WASIIR XOOSH**